



Gacaliye,

Waxaan ka gudubnay qayb kamid ah nidaamka baarista, yareynta halista markii loo baahdo, iyo dib uga baarista dhammaan guryahayga dawladda radhoon, gaaska sida dabiiciga u jira ee abuurii kara halisyada caafimaad. **Dhismahaaga mar hore ayaa la baaray, oo heerar kasta oo radhoon oo laga helay ee ka sareeyay heerarka badqabka caadiga ee EPA (4 pCi/L) waa la hagaajiyay.** Waxaan ku wadi doonaa dhismahaaga diyaarin dib-u-baaritaan dhowrkii sanadba si loo hubiyo inuu ka hooseeyo heerkaas.

Baaritaanka radhoon iyo yareynta halista loogu talagalay guryahayaga dawladda way socotaa waxaana la dhameystiri doonaa dhammaadka 2020.

Waxaan kala shaqeynaynay wariye warbixin ku saabsan radhoon iyo maamulada guryeynta dawladda ee dalka oo dhan. Waxaan rajeynaynaa in Home Forward ka soo muuqan doonto maqaalkan. Waxay noqon kartaa mid walaac badan inaad akhriska iyo daawashada wararka ka ogaato wax ku saabsan shay saameyn kara gurigaaga, waxaana warqaddan ku soo darnay macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shaqada aan wax uga qabaneyno arrintan. Mar labaad, baaritaanka iyo yareynta halista looga baahanyahay gurigaaga horay ayaa loo dhameystiray, oo heerarka randoon ee dhismahaaga ku jira ayaa ka badneyn heerarka caadiga ee EPA.

Haddii aad jeceshahay macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan arrintan, fadlan ka booqo weebsaydkayaga <http://www.HomeForward.org/RadonInfo>, halkaas oo aad ka heli doonto siyaasadayada radhoon, su'aalaha badanaa lana weydiyo, turjumaada warqaddan oo ku qoran luqado kala duwan iyo xiriiriyeyaasha dhigaalada kale.